# Adeegga Dabiibka Hadalka iyo Luqadda ee Carruurta
Talada loogu talagalay Waaldiiinta iyo Daryeeleyaasha.

## Fursado Wadaxiriiir oo aad u Samayso ilmahaaga

### Waxqabadyada iyo xeeladaha la isku dayo:

Waxaa muhiim ah in aad samayso ama abuurto fursado wadaxiriir si aad u dhiirrigeliso codsiyada iyo macaamilada.

- **Xulashooyin Bixi**: Tus labo shay (sida kubbad iyo xumbo). Weydii "Miyaad rabtaa kubbad?" (kubbadda tus) "Mise xumbo?" (xumbada tus). U rukhsee in ay kala doortaan. Sheeg magaca waxa ay doortaan. Hubi in ay horta labada shay eegaan.

- **Qaybo Yar yar Markiiba:** Waqtiga ciyaarta, ilmahaaga markii kasteba sii xoogaa shay oo lagu ciyaaro. Marka ay ciyaarta dhammeeyaan, waa in ay ku weydiistaan ama ku tusaan in ay rabaan shayo kaloo lagu ciyaaro.

- **Samee Waxyaabo Caqli xun:** Samee wax lama filaan ah, sida moos aad koob ku dhex riddo! Eeg haddii ay ku tusaan in ay taasi qalad tahay.

- **Sug ka hor inta aadan caawinin:** Sug in ilmahaagu kuu sheego ama ku tuso in ay gargaar uga baahan yihiin hawlaha maalin walba sida xirashada jaakadkooda ama koodhkooda. Meel iyaga u dhow joog, si ay u ogaadaan in ay u joogto. Iyaga sii waqti ay gargaar kugu weydiistaan ka hor inta aadan caawinin. Sugidda ka hor inta aadan caawinin ayaa ilmahaaga fursad u siinaysa in ay muujiyaan in ay gargaar u baahan yihiin (matalan koob ay adiga kuu keenaan). Ilmahaaga ha sugsiinin waqti xad dhaaf ah haddii aanay garanayn sida ay adiga kuula xiriirayaan ama kuula hadlayaan.

Soo dhawee dhammaan noocyada wadaxiriirka, hadal leh ama aanan hadal lahayn. Haddii ay adiga farta kugu fiiqaan, ku eegaan, ama wax kuu dhiibaan, taasi waa wadaxiriir.

Marwalba sheeg ereyga ku toosan waxa ay rabaan ama ficilka.